Daabac Dib-u-sax foomka

Oregon Health Authority

Oregon HEALTH PLAN

Ogolaanshaha Wadaagista Macluumaadka Adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira ee Qorhshaha Caafimaadka Oregon

Magaca koowaad/hore:	Magaca ama magacyada dambe:	Taariikhda dhalashada (BB/MM/SSSS):	
Cinwaanka boostada:	Magaalada:	Gobalka:	Furaha boostada:
Lambarka taleefoonka:	Iimaylka:	Aqoonsiga OHP Medicaid:	

Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) wuxuu daboolaa adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira (HRSN) oo adiga bilaash kuu ah. Adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira waa shayo iyo taageerooyin sida:

- Hawo qaboojiye
- Qaboojiye yar oo daawada loogu talogalay
- Cuntooyin gaar ah oo xaaladdaada caafimaad loogu talogalay
- Taageero guriyeyn

Bixiyayaasha adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira waa ururo ama dad bixiya adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira. Haddaad buuxiso oo aad saxeexdo foomka hoose waxaad ogolaan doontaa (ogolaansho):

- Wadaagista macluumaadkaaga caafimaadka iyo macluumaadka kale ee qarsoodiga ah iyadoo ujeedadu kaliya tahay ujeedooyinka lagu sheegay Qaybta 1 ee hoose.
- Ururada iyo dadka cayiman ee macluumaadkaaga lala wadaagayo. Waxaa waajib ah inay wadaagaan ugu yaraan xaddiga loo baahan yahay si ay uga hawlgalaan adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira.

Saxeexista foomkan **ma**:

- Ogolaanayso cidnaba inay bilayska ama hay'adaha kale ee socdaalka la wadaagto macluumaadkaaga.
- Aha macniheedu inaad bixiso wax ka mid ah kharashka dheefaha Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira.

Qaybta 1. Ujeedooyinka wadaagista macluumaadka.

Inaad saxeexdo waxay ka dhigan tahay inaad ogolaatay (ogolaansho) macluumaadkaaga caafimaadka iyo macluumaadka kale ee qarsoodiga ah in lala wadaago:

(a) Go'aaminta haddii aad mutaysatay inaad hesho adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira

(b) In laguu gudbiyo, lagaa caawiyo helitaanka, ama inaad hesho adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira, iyo

(c) Aqoonsiga, taageerada, isku duwidda, baddalista iyo in lagaa bixiyo kharashka adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira.

Qaybta 2. Noocyada macluumaadka la wadaagayo.

Haddaad saxeexdo waxaad ogolaanaysaa (ogolaansho) noocyada macluumaadka ee soo socda ee kugu saabsan in loo wadaago kolba sida loogu baahdo ujeedooyinka ku xusan Qaybta 1. Macluumaadka waxaa kaliya la wadaagayaa marka ay daruuri tahay.

(a) Warbixinta xogta dadka. Tani waxaa ka mid ah:

- Magaca
- Da'da
- Taariikhda dhalashada
- Cinwaanka
- Macluumaadka xiriirka, iyo
- Wixii baahiyo adeegsi ah, sida caawimada in luuqad kale ama nakhshad kale laga dhigo, si aad u adeegsan karto adeegyada. Tani sidoo kale waxay kugu xiri doontaa adeeg bixiye adeegga Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira kaasi oo fahamsan luuqadda ama dhaqankaaga.

(b) Macluumaadka caafimaadka ilaashan qaarkood (PHI). Kani waxaa ka mid noqon kara:

- Mutaysigaaga Medicaid (OHP)
- Taariikhda caafimaadkaaga:
  - Natiijooyinka shaybaarka
  - Isticmaalka daawada
  - Xaaladaha caafimaadka, iyo
  - Daawaynta.

(c) Macluumaadka gaarka ah ee Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira. Tani waxaa ka mid ah:

- Sababaha aad u mutaysatay adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira, sida xaaladaha caafimaadka ama duruufaha

nolosha
- Adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira ee aad heli karto, iyo
- Bixiyayaasha adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira ee kula shaqeeyey.

(d) Macluumaadka caafimaadka dhimirka. Kani waxaa ka mid noqon kara:

- Waxyaalaha lagaa helay iyo daawayntaada ee dhanka dhimirka. Waxa kaliya la wadaagi doonaa marka ay daruuri tahay. **Tan kuma jiraan xusuusqorrada saykoterebiga.**Waxaa waajib ah inaad bixiso ogolaansho kale si loo wadaago xusuusqorradan.

(e) Macluumaadka isticmaalka mukhaadaraadka. Kan waxaa ka mid noqon kara:

- Isticmaalkaaga khamriga hadda iyo tii hore ama daroogada
- Xanuunnada lagaa helay
- Daawooyinka, iyo
- Barnaamijyada daawaynta bukaan-socodka iyo bukaan-jiifka, iyo
- Macluumaadka ku saabsan dhaawaca shucuurta ee aad la kulantay ee saameeyey ama saameeya isticmaalkaaga khamrada ama daroogada.

Macluumaadka isticmaalka mukhaadaraadka ama khamrada ee kugu saabsan ee laga helo bixiyayaal ay waajib ku tahay inay ku dhaqmaan qawaaniinta qarsoodiga ee isticmaalka mukhaadaraadka (42 C.F.R Qeybta 2) ayaa KALIYA la wadaagi karaa HADDAAD sax saarto dhammaadka foomkan.

(f) Macluumaadka guriyaynta. Tani waxaa ka mid ah guriyayntaada:

- Xaaladda
- Taariikhda, iyo
- Taageerooyinka.

Qaybta 3. Shuraakada Daryeelka ee wadaagaya ama helaya macluumaadkaaga.

Haddaad saxeexdo waxaad ogolaanaysaa (ogolaansho) in Shuraakada Daryeelka ee soo socdaa ay wadaagi karaan oo heli karaan macluumaadkaaga:

- Dadka iyo ururada ku lugta leh:
  - Daryeelkaaga caafimaad,
  - Adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira, iyo
  - Isku duwidda daryeelka.

Waxay kaliya u wadaagi karaan macluumaadkaaga ujeedooyinka lagu faahfaahiyey Qaybta 1 ee foomkan. Shuraakada Daryeelka iyo qandaraaslayaashoodu waxay ogolyihiin inay ku dhaqmaan dhammaan shuruucda ku saabsan ilaalinta macluumaadkaaga iyo wadaagista macluumaadkaaga. Shuraakada Daryeelkaaga waxaa ka mid noqon kara kuwa soo socda:

(a) Bixiyayaasha daryeelka caafimaad. Kuwan waxaa ka mid noqon kara:

- Isbitaallada
- Rugaha caafimaadka
- Dhakhaatiirta
- Farmashiyayaasha
- Dhakhaatiirta ilkaha, iyo
- Bixiyayaasha caafimaadka habdhaqanka.

(b) Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA).

(c) Maamulaha OHA, Acentra Health, ee dheefaha iyo lacag-bixinta OHP “Open Card” (adeeg lacag ah).

(d) Bixiyayaasha iyo gadayaasha adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira ama bixiya adeegyada ama shayada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira, sida hawo-qaboojiye, oo hoos taga dheefta Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira. Lifaaqa A ayaa taxaya bixiyayaasha.

Qaybta 4. Muddada ogolaanshuhu jirayo. Markaad saxeexdo foomkan wixii ka dambeeya waa dhaqangal ilaa ay mid ka mid ah waxyaalahan dhacaan:

(a) Ay 12 bilood ka soo wareegtay taariikhdii aad saxeexday foomkan.

(b) Aad ka laabatay (burisay) foomkan. Waxaad sidoo kale sidaas u samayn kartaa wax ka mid ah qaababka soo socda:

- Soo wac 1-888-834-4304
- Iimeylka ORHRSN@kepro.com, ama
- Fakas 1- 833-551-2607.

(c) Aad isbaddal ku samayso foomkan. Foomka cusub wuxuu noqonayaa dhaqangal taariikhda aad dirto isbaddalada. Waxaad sidoo kale sidaas u samayn kartaa wax ka mid ah qaababka soo socda:

- Soo wac 1-888-834-4304
- Iimeylka ORHRSN@kepro.com, ama
- Fakas 1- 833-551-2607.

Qaybta 5. Xuquuqdaada. Haddaad saxeexdo waxay ka dhigan tahay inaad fahamtay oo aad ogolaatay in:

(a) Aad ka laaban (burin) karto ama baddali karto foomkan markii aad doonto una baddali karto qaababka soo socda ka aad doonto:

- Soo wac 1-888-834-4304
- Iimeylka ORHRSN@kepro.com, ama
- Fakas 1- 833-551-2607.

(b) Haddaad ka laabato (buriso) foomkan, Shuraakada Daryeelka ma joojin karaan ama tirtiri karaan wixii macluumaad ah ee la wadaagay, haddana la wadaagay, ama la helay.

(c) Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul foomkan ah.

(d) Shuraakada Daryeelkaagu waxay la wadaagi karaan oo haddana la wadaagi karaan macluumaadkaaga dad ama ururo kale. Hase yeeshee, waxay kaliya sidaas samayn karaan inta sharcigu u ogolyahay ama sida lagu sheegay foomkan.

(e) Waxaad heli kartaa liis ah Shuraakada Daryeelka ee helay macluumaadkaaga. Si aad u codsato liiskan, mid ka mid ah qaababka soo socda samee:

- Soo wac 1-888-834-4304
- Iimeylka ORHRSN@kepro.com, ama
- Fakas 1- 833-551-2607.

Khasab kuguma aha inaad saxeexdo foomkan. Haddii aadan saxeexin foomkan, kooxdaada Open Card ayaa ku siin doonta nuqul ah ansixinta ogolaanshahaaga adeegga Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira. Waxaad u baahan doontaa inaad toos u waydiiso adeeg bixiyaha adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira si aad u ogaato adeegyada la ansixiyey.

Xitaa haddaad doorato inaadan saxeexin foomkan, waad:

- Heli doontaa dhammaan dheefahaaga, daawaynta, ama daryeelka.
- Heli doontaa go'aan ku saabsan haddii aad ansixisay ama diiday adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira.
- Bixin **maysid** kharashka adeegyada Baahiyaha Bulshada Caafimaadka la Xiriira.

Haddaan saxeexo foomkan waxaan ogolahay (ogolaansho) Shuraakada Daryeelkaygu inay isticmaalaan oo wadaagaan macluumaadkayga caafimaadka iyo macluumaadka kale ee qarsoodiga ah iyadoo ujeedadu tahay Qaybta 1 ee foomkan.

Haddaan si ulakac ah ugu qoro lambarkayga taleefanka foomkan, waxaan ogolahay in farriimo qoraal ah ama wicitaano iiga yimaadaan Shuraakada Daryeelkyga (farriin caadi ah waxaana jiri doona kharash data-da internetku soo dallacdo). Shuraakada Daryeelkaygu waxa dhici karta inay farriin ama wicitaan u diraan lambarka si ay iigu sheegaan:

- **Dookh yadayda ogolaanshaha iyo**
- **Sida macluumaadkayga loo wadaagi karo.**

☐ **Sax saaridda sanduuqan wuxuu ka dhigan yahay inaan sidoo kale ogolahay (ogolaansho) wadaagista macluumaadka isticmaalka mukhaadaraadka ee igu saabsan ee laga helo bixiyayaasha kuwaasi oo ay waajib ku tahay inay raacaan qawaaniinta qarsoodiga isticmaalka mukhaadaraadka ee fadaraalka (42 C.F.R. Qeybta 2).**

Haddaad adiga naftaada saxeexayso, buuxi xariiqda koowaad. Haddaad cid kale u saxeexayso, buuxi xariiqaha labaad iyo saddexaad.

Magaca xubinta:	Saxeexa xubinta:	Taariikhda (bb/mm/ssss):
Magaca wakiilka:	Saxeexa wakiilka:	Taariikhda (bb/mm/ssss):
Waxay isku yihiin wakiilka iyo xubintu ama faahfaahinta idamka u saxeexista xubinta:		

Dukumintigaan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, daabacaad ballaaran, farta indhoolaha ama nakhshadda aad doorbidaysid. Kala xiriir Chelsea Egbert chelsea.egbert@oha.oregon.gov ama 503-945-5772 (cod iyo farriin qoraal ah). Waxaanu aqbalnaa dhammaan wicitaannada gudbinta.